

# Jidka Lahaanshaha Guriga

## (1) Isu-Keen Kooxdaada

**GURI-IIBIYE®:** Inta badan iibsadayaashu waxay doortaan GURI-IIBIYE® si uu uga hago habsocodka iibka. Weydii saaxiibadaa iyo qoyskaaga haddii ay jiraan GURI-IIBIYEYAAL® ay u hayaan kalsooni iyo ixtiraam. Waxaad weydiin kartaa waayo-aragnimada iyo tababarka GURI-IIBIYEYAASHU® ay leeyihiin, waxaad codsataa liis tixraacyayaal ah, oo weydii haddii ay aqoon u leeyihiin meelaha aad doonayso inaad ku noolaato. GURI-IIBIYEYAHAAGU® waxaa uu inta badan yeelan doonaa talooyin ku saabsan xubnaha kale ee ka tirsan kooxdaada gadasho haddii aadan haysan xiriir aad doorbidayso. Dib u eegis ku samee kharashka aad fileyso inta lagu guda jiro habka iibka ee aad la waddo GURI-IIBIYAHA®.

**La-Taliyaha Amaahda:** La-taliye amaahda wuxuu dib u eegis ku sameeyaa ujeedooyinka gadashada isagoo kaala shaqeyn doona xagga go'aan ka qaadashada fursadaha ugu fiican ee ku habboon ujeedooyinkaas. Qaar ka mid ah la taliyayaasha amaahda waxay helaan barnaamijyo ka badan kuwa kale. Waxay kaa caawin doona xagga go'aan qaadashada inta aad awoodi kartid kuna salaysan tilmaamaha amaah-bixiyayaasha. Markaas waxaad go'aansan kartaa wixii kuu sahlan xagga bixinta lacagta ka go'i karta miisaaniyadaada.

## (2) Dhamayso Habsocodka Ansixinta Hore

La-Taliyahaaga xagga amaahda waxa uu hubin doonaa taariikhda shaqadaada iyo amaahdaada. Waxay kaa caawin doonaan in la qiyaaso kharashka ku lugta leh amaahda. Waxaa laga yaabaa in ay jiraan hawlo kale oo dheeraad ah ama dokumentiyo loo baahan yahay si loo dhamaystiro habsocodka codsiga. Waxaa aad u fiican in la helo ansixinta hore ka hor inta aanad bilaabin raadinta gurigaaga cusub.

## (3) Bilow Aragtida Guryaha

La kulan GURI-IIBIYAHAAGA® si aad uga wada hadashaan nooca guriga aad rabto. GURI-IIBIYAHAAGU® waxa uu kaa caawin doona in aad heshid guryaha ugu fiican ee dabooli kara baahiyahaaga iyo xaddiyada kala duwan ee qiimaha aad dooneyso. GURI-IIBIYAHAAGA la soo indha-indhee meelaha aad dooratay ee aad jeceshahay kadibna dooro guriga ugu wanaagsan ujeedooyinkaaga.

## (4) Bixi Dalab

Ka dib marka aad dib u eegto macluumaadka ku saabsan kala iibsiga dhawaan ka dhacay goobta, GURI-IIBIYAHAAGU® waxa uu diyaarin doonaa una soo bandhigi doonaa iibiyaha dalabkaaga. GURI-IIBIYAHAAGU® waxa uu kaa caawin doonaa kala gorgortanka shuruudaha

heshiiska iibsiga u dhaxeeya adiga iyo iibiyaha isagoo maskaxda ku hayn doona danahaaga ugu fiican.

**(5) Buuxi Kormeeridda Guriga**

Kormeeridda guriga ma aha wax guud ahaan loo baahan yahay, laakiin had iyo jeer waa wax lagu taliyo. Shaqaaleynta kormeere xirfadeed oo guri waxa uu kaa caawin doona inaad go'aan ka gaadho haddii ay jiraan wax dhibaatooyin waaweyni iyo in si fiican loo fahmo tixgelinta dayactirka si aad u ilaaliso maalgashigaaga.

**(6) Dhameystir Habka Amaahda**

La-Taliyahaaga amaahdu waxa uu dhameys tiri doonaa ka baaraandegidda codsigaaga amaahda, marka la helo heshiiska iibsiga lagu aqbalay. Waxaa la amri doonaa in la sameeyo qiimayn si loo xaqiijiyo qiimaha gurigaaga. Waxaa laga yaabaa in dukumentiyada dheeraad ah uu soo codsado amaah-bixiyuhu si loo dhameeyo amaahdaada.

**(7) Soo-Afjarid**

Wax yar ka hor soo afjaridda, GURI-IIBIYAHAGU® waxa uu sameyn doonaa jadwal kama dambays ah oo la raadraacayo guriga si loo xaqiijiyo in wax walba ay ku habboon yihiin wixii laga filaayey iyo qodobada heshiiska iibka. Shirkadda horyaalku waa inay xaqiijiso in aysan jirin arrimo kaa joojiya inaad qaadato lahaanshaha hantida. Soo-afjaruhu waxa uu diyaarin doonaa dhammaan dokumentiyada lagu kala iibsaday, iyagoo kuligood kula wada fiirin doona, iyo isku xirka diiwaangelinta dokumentiyadaasi ka dib marka ay dhacdo soo afjariddu. Marka ay dhacayso soo afjariddu, waxaad saxiixi doontaa waraaqaha si iibiyaha looga soo wareejiyo lahaanshaha guriga. Markaas waxaa lagu siin doonaa furayaasha gurigaaga cusub!

**La xidhiidh GURI-IIBIYE® siaad u bilowdo habsocodka maanta!**